

- D. Waa qofka ugu xog ogaalsan xaaladda shirkadda, uguna khibradda badan waddanka sida loo wada qirsanyahay.
- E. Waa qofka ay tilmaameen qaar ka mid ah dadkii aan ka talo waydiinay ee ka baxsanaa xubnaha SOMGULF.
- F. Waa qofka kaliya ee ay ka muuqatay in uu leeyahay qorshe isku day badbaabinta xuquuqda.
2. Xasan Jaamac Maxamed waa inuu siiyaa xubnaha kale ee SOMGULF qoraal uu ku caddaynayo in uu kala wareegay dhammaan xuquuqdii ay dadka mas'uulka uga ahaayeen, sharci ahaanna ka bari yihiin wixii ka yimaada xukunkan kadib, cid danbe oo hanti ku lahayd SOMGULF oo qabsan kartana aanay jirin, marka laga reebo guriga GMC oo ay xanbaarayaan mas'uuliyadiisa gudiga maamulka ee hantiilayaasha sida ku cad heshiisyadii hore ee aan soo tilmaanay, qoraalkaas oo la marinayo, Kaatib Cadli-ga hadii uusan qaanuunku diidayn.
3. Mashruuca Sharjah ee Al Zahour waxaa la tixraacayaa go'aankii ay soo saareen Guddiga Garsoorka ee soo baxay June 9, 2012.
4. Mashruuca GMC ama Twin Towers ee Cajmaan, waxa ay culumadu Xukumeen sidan:
- A. Waxaa mashruucaan iska leh dadka laga gaday, iyagaana maamulkooda u madax banaan.
- B. Dhamaan heshiisyadii ay galeen SOMGULF & dadka guryaha leh ee lagu sameeyay maamulka madaxa banaan waa lama taabtaan, waxaana waajib ku ah dhamaan dhinacyadu in ay ilaaliyaan, waxaana ka mid ah heshiisyadaas:
1. Heshiiskii la saxiixay Jan 6, 2013 oo ay SOMGULF ku wareejisay maamulka guriga GMC dadkii guryaha lahaa.
 2. Heshiiska la saxiixay 31 August 2013 ee gadidda & Maamulka gurigaan (GMC).
 3. Wakaaladihii ay bixiyeen milkiilayaasha SOMGULF ee 5-ta ah oo ay Guddiga Maamulka guriga ugu wareejiyeen iibka guriga.
 4. Go'aankii ay Guddiga khilaafaadku soo saareen Nov 12, 2013 ee lagu dhex-dhexaadiyay Guddiga Maamulka guriga GMC & SOMGULF, labada dhinacna aqbaleen.
- C. Waxaa Xasan Jaamac Maxamed laga doonayaa in uu si wanaagsan ula shaqeeyo gudiga wakiilka ka ah milkiilayaasha gurigan maadaama uu yahay qofka ku hadhay mas'uuliyadda & hantida SOMGULF.
- D. Waxaa sidoo kale laga doonayaa Guddiga Maamulka guriga in ay wanaajiyaan wada shaqaynta ka dhaxaysa ayaga iyo Xasan Jaamac Maxamed, kana dheeraadaan wax kasta oo keeni kara isfaham la'aan.
- E. Waxaa heshiisyadaas lagu jabin karaa oo kaliya heshiis kale oo ay dib u wada galaan dhinacdii heshiisyadaas horay u wada galay.
- F. Dadka guryaha ku leh GMC xaq uguma leh in ay dacweeyaan SOMGULF maadaama laga wareejiyay maamulkii & mas'uuliyadii gurigan.
5. Haddii ay SOMGULF ka hesho guriga GMC wax dhaqaale ah waxaa loo qaybinayaa sidan:
- o Xasan Jaamac Maxamed wuxuu qaadanayaa 60% maadaama uu xanbaaray mas'uuliyadkii SOMGULF.
 - o Xubnaha kale ee afarta ah waxay qaadanayaan kiiba 10% oo isku noqonaysa 40%.

Cfu
12/12/2014

[Signature]
12/12/2014

[Signature]
12-12-14